

Dhacdooyinka shilalka keddīs yay kugu noqon!

Maadaama gaadiid tagasi aad leedahay, waxaad 4 jibaar halis ugu jirta inaad shil gasho, waa haddii la barbardhigo qofka rayidka ah ee gaarigiisa ku wado waddooyinka dalka Norway. Sidaas awgeed, waa arrin aad muhiim u ah in adiga iyo shaqaalahaaga ba aad isku diyaarisaan dhacdada xaaladaha noocaas ku salaysan.

Maamulka Shirkadda Caymiska Storebrand Forsikring, wuxuu raba in geedisocodka arrintaan u sida ugu dhaqsi badan oona sahlan kaaga dhigo. Taasoo iyaduna ku xiran sida adiga iyo shaqaalahaaga ugu warqabtaan iyo sida Shirkadda Caymiska Storebrand Forsikring ay doonayso in arrimaha loo maareeyo. Halkaan hoos waxaa ku qoran dhawr naseexooyin iyo hagid xiriir la leh dhacdooyinka shilka traafikada/gaadiidka.

Waa kuwaan naseexooyinka

- Mar kasta waa in diyaar u ku yahay gaariguna ku yaallo foomka wargelinta shilalka [skademeldingsskjema], kaasoo ku qoran/ku buuxsan magacaaga, summadda, magaca shirkadda caymiskaaga iwm. Ka sii fiican haddii wade kasta u haysto foom u diyaar ah oo buuxsan. Xaaladdaas qofka dhacda lug ku leh, wuxuu xog-saari karaa warbixinada kale ee muhiimka ah ee xiriirka la leh wargelinta waxyeelida shilka.
- Foomka wargelinta waxyeelka-shilka ku qor taariikhda dhacdada, ha la sugin ilaa maalinta ku xigta.
- Gacanta ku masawir masawirka saxda ah, goobta wadada u shilka ka dhacay, musaafada garabka wadaddada, musaafada is-goyska iwm.
- Waa in wadajir aad soo gudbisaan wargelinta waxyeelka-shilka.
- Sawirro ka qaad goobta shilka u ka dhacay iyo gawaarida ba.

Wargeli waxyeelka shilka

Caymiska wuxuu hirgala kaddib markii waxyeelka shilka u dhaco. Sidaas darteed, ahmiyadeenna waxay tahay inaad khibrad wanaagsan oo xiriir la leh sheegashada magdhow aad hesho.

Markii waxyeellooyinka shilka ay dhacaan (oo aan ahayn kuwa muraayadaha iyo gurmada xiriir la leh), waa in sida ugu dhaqsi badan waaxda arrimaha waxyeellada shilalka (skadeavdeling) aad khadka taleefanka 91508881 ku wargelisa waxyeellada shilka. Ulajeedada waxay tahay in lagu siiyo lambarka waxyeellada ee shilka u gaar ah [skadenummer]. Kaddib markii lambarka noocaas lagu siiyo, ayaa adigoo [halkaan](#) jag-siiya, waxaa la xiriiri kartaa mid ka mid ah garaashyada agagaarka ku yaalaan. Taasoo suurtagelin doonto in sida ugu dhaqsi badan dib loo hagaajiyo waxyeellada shilka.

Muraayadaha ma waxyeelmeen mise gurmada waddada ayaa u baahan tahay?

Shirkadda Caymiska ee Storebrand Forsikring waxay heshiis la gashay shirkadda [Hurtigruta Carglass] oo ah shirkad dib u hagaajiso muraayadaha, waxayna ka hawlgasha dalka oo idil. Adigoo barta internetka shirkadda ama khadka taleefanka + 47 22 31 19 99 ayaa toos ballan u qabsan kartaa. Sidoo kale, adigoo adeegsanayo isla lambarka + 47 22 31 19 99 ayaa waydiin kartaa wixii su'aallo ah oo xiriir la leh waxyeellada muraayadaha. Kharashka caymisanaha u bixin doono [Egenandelen] waa 3.000 NOK, - waa haddii shuruud kale aynan ku xusnayn qoraalka heshiiska caymiska.

Markii aad u baahan tahay gurmada waddooyinka SOS, waxaad la xiriiri kartaa shirkadda gurmada ee caalamiga oo wada-shaqaynta naga dhaxayso, lambarka waa +47 22 48 90 00. Wixii dayactir oo fudud goobta shilka ayay ku sameeyaan, ama waxay gaariga u qaadi doonaan garaashka goobta ugu dhow. Kaddib waxay adiga iyo rukaabka tagsiga idinka caawinayaan sidii aad guryahiina ugu noqon lahaydeen.

Kharashka caymisanaha u bixin doono [Egenandelen] waa 1.000 NOK

Warbixin waxtar leh

Waxaan u baahan nahay gurmada waddooyinka	<p>Markii aad u baahan tahay gurmada waddooyinka SOS, waxaad la xiriiri kartaa shirkadda gurmada ee caalamiga oo wada-shaqaynta naga dhaxayso, lambarka waa +47 22 48 90 00. Wixii dayactir oo fudud goobta shilka ayay ku sameeyaan, ama waxay baaburka u qaadi doonaan garashka googta ugu dhow. Kaddib waxay adiga iyo rukaabka tagsiga idinka caawinayaan sidii aad guryahiina ugu noqon lahaydeen</p> <p>Kharashka caymisanaha u bixin doono [Egenandelen] waa 1.000 NOK</p>
Muraayadaha gaariga shilka dartiis ayay waxyeelmeen	<p>Shirkadda Caymiska ee Storebrand Forsikring waxay heshiis la gashay shirkadda [Hurtigruta Carglass] oo ah shirkad dib u hagaajiso muraayadaha, waxayna ka hawlgasha dalka oo idil. Adigoo barta internetka shirkadda ama khadka taleefanka + 47 22 31 19 99 ayaa toos ballan u qabsan kartaa. Sidoo kale, adigoo adeegsanayo isla lambarka + 47 22 31 19 99 ayaa waydiin kartaa wixii su'aallo ah oo xiriir la leh waxyeellada muraayadaha. Kharashka caymisanaha u bixin doono [Egenandelen] waa 3.000 NOK, - waa haddii shuruud kale aynan ku xusnayn qoraalka heshiiska caymiska.</p>
Gaariga wuxuu ku dhacay gaari kale	<p>Haddii gaarigaaga u gaari kale ku dhaco, waa in adiga iyo qofka kale aad wargelisaan shirkadda caymiska ee aad ka tirsan tihiin. Buuxi foomka wargelinta waxyeelka-shilka ee Yurub, kaddib soo gudbi markii aad waxyeelka-shilka aad na wargelinayso. Haddii qofka kale usan doonayn in uu foomka wargelinta waxyeelka-shilka ee wadjirka u buuxisen hoosta ka saxiixo, waxaa qofka waajib ku ah in uu sheego warbixin-shaqsiyeedkiisa iyo lambarka diiwangelinta gaariga. Haddii warbixin dheeraad aan u baahanno waan kula soo xiriiri doonaa. Ha isticmaalin caymiska xitaa haddii aad diiwangeliso waxyeelka-shilka. Uma baahnid inaad isticmaasho caymiska xitaa haddii aad soo sheegto dhaawaca.</p>
Gaariga wuxuu u baahan yahay in garaash lagu dayactiro/dib loogu hagaajiyo	<p>Kahor inta gaariga aan la dayactirin/dib loo hagaajin, waa in waxyeelka-shilka anaga noola wargeliyaa oo aan kaddib idin sinaa lambarka waxyeelka-shilka u gaarka ah [skadenummer]. Kaddib markii aad diiwangeliso waxyeelka-shilka, waxaad qiimayn darteed ballan ka qabsanaysa garaashyada shirkadaynna heshiiska la gashay. Garaashka wuxuu marka hore sameeynayaa qiimaynta waxyeelka-shilka. Haddii kharashka dayactirka aan anaga bixin doonin, adiguna aadan hubin haddii aad doonayso in lagu dayactiro waxyeelka-shilka iyo in kale, waxaa inkastoo sidaasi tahay haddana lagula talinayaa in lagu qiimeeyo waxyeelka-shilka. Sidaas ayaa kaddib ku ogaan kartaa kharashka dayactirka/dib u habaynta.</p> <p>Haddii kharashka dayactirka/dib u habaynta ay shirkadda caymiska bixin doonto, waa in kahor inta garaashka u ku dhaqaaqain dayactirka/dib u habaynta aan anagu aqbalna kharashka. Kaddib markii shirkadda caymiska ay aqbasho bixinta kharashka ayaa wakhtiga dayactirka/dib u habaynta toos ugu la heshiin kartaa maamulka garaashka. Haddii gaarigaaga aad geysa garaash oo aan heshiis shirkadaynna la gelin, waa inaad ku wareejiisa garaash kale oo anaga heshiis noola galay. Halkaas ayaa lagu dayactiri doonaa.</p>
Immisa ayay noqon doontaa qaybta kharashka caymiska [egenandelen] aan aniga bixin doono?	<p>Inta u yahay kharashka caymiska aad bixin doonto [Egenandelen] wuxuu ku qoran yahay warqadda caddaynta caymiska [forsikringsbeviset]. Qaar qodobada ugu muhiimsan waxay yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none"> • kharashka caymisanaha u bixin doono ma bixinaysid haddii keligaa aad arrinta mas'uul ka tahay. • Markii dayactirka/dib u habaynta waxyeelka-shilka ee gaarigaaga, badi ahaan waxaa la bixiyaa kharashka caymisanaha u bixin doono [Egenandelen]. • Markii laba gaari isku dhacaan waxaa kharashka caymisanaha u bixin doono qofka shilka sababay. Markii dayactirka/dib u habaynta waxyeelka shilka, waa in kharashka caymisanaha u bixin doono aad toos u siisaa maamulka garaashka.
Haddii aan abaalmarin [bonus] leeyahay ma layga jari doonaa?	<p>Tagsiyada abaalmarin ma lahan</p>
Caymiska ma daboolo kharashka gaari la kireystay?	<p>Maya</p>
Gaariga waxyeello ayaa loo geystay	<p>Waxyeella gaariga loo geystay oo u sabab ah kharribaadda way caymisan yihiin haddii aad leedahay caymis daboolo qolofa [kaskodeknningen].</p> <p>Markii aad na wargelinayso dhacdada waxyeella waa inaad noo macnaysaa waxa aad u malaynayso in ay dhaceen.</p> <p>Haddii weli aad na wargelin wax cabasho ah, waxaad weli haystaa fursad aad halkaan noogu soo gudbisno arrinta caymiskaaga. Tan kale, waa in sida ugu dhaqsi badan aad dhacdada ciidanka booliska wargeliso. Kaydso xogta xaalad baarista. Adigoo adeegsanayo adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] ayaa halkaan ciidanka booliska wargelin kartaa dhacdada.</p>
Caymiska daqliga caymisanaha soo geli lahaa	<p>Markii daboolida la jarayo. Daboolida noocaan ah waxaa ugu badnaan la bixin karaa 40 maalmood, tiriskaas oo laga soo bilaabo maalinta 4-aad oo ku beegan maalinta waxyeelka shilka dartiisa gaariga tagsiga waddada laga saro.</p>

	<p>Magdhowga ugu badnaantii waa 3 500 NOK maalintii. Markii daqliga caymisanaha soo geli lahaa la xisaabinayo, waa in la isticmaala foomka u gaar ah Isbahaysiga ururrada tagsileyaasha ee dalka Norway "Norges Taxiforbund", xisaabtaas ayaa magdhowga lagu saleeyaa.</p> <p>Haddiise waxyeelka-shilka u sababay qofka kale, wuxuu caymiska hirgalayaa maalinta 1-aad. Xaaladdaas shirkadda caymiska ee caymisanaha ayaa magdhowgaayaa u dalbanayso.</p>
Haddii heshiiska aadan ku qanacsanayn	<p>Haddii go'aanada shirkadda aad ku qanacsanayn, waxaad xaq ku leedahay inaad rafcaan ka qaadato. Xaaladdaas waa inaad rafcaanka oo qoraal ah oo ku saabsan arrinta caymiskaaga noo soo dirta. Waxaa muhim ah inaad qoraalka rafcaanka ku soo qorto sababta aad go'aanka rafcaan ugu qaadnayso iyo wixii xog ah oo arrinta xiriir la leh.</p> <p>Kaddib markii aad rafcaankaaga helno waxaad jawaab naga heli doontaa 21 maalmood gudahooda</p>

Caymiska lafafa tagsiga [Taxi Kaskoforsikring]

Waxa caymiska u daboolo:

Kuwaani waa waxyaalaha caymiska tagsiga u daboolo

Mas'uuliyadda gaariga	Waa mas'uuliyad sharciga ku salaysan
Jabsasho	
Dab-kac	
Waxyeelidda lafaha-gaariga	caymisku wuxuu daboolo waxyeelida gaariga caymisanaha, sida haddii u gadoomo, gaari kale ku dhaco ama dhacdo oo aan ugu talagal ku salaysnayn oo keddis ku dhaca iyo dhacdo gudaheed
Aqbalidda xaddadan	<p>- Magdhowga waxaa la siin karaa caymisanaha xitaa haddii qofka gaariga mas'uul ka ah u sababay waxyeelidda, isagoo</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ula kac ahaan ama taxadar-daro culus. • Saameynta khamriga ama maandooriyaha. • Wadista waddada ka baxsan oo xadgudub ku ah xaddidaadaha heshiiska ku qoran. • Amni xumada. <p>Si kastaba ha ahaatee, xaaladdaani ma khuseyso haddii "qofka gaariga mas'uulka ka ah", u tiro ka badan boqolkiiba 10% shirkadda ka leeyahay, ama uu ka qaybqaato guddiga shirkadda ama maamulka.</p>
Mas'uuliyadda shirkadaha	Waxay ka damaanad qaadaysaa in adiga oo ah milkiyaha in lagu siiyo magdow aan qabyo ahayn, markii qof shaqaale ah u sababo waxyeelidda: ula kac ahaan ama taxadar-daro culus awgeed, saameynta khamriga ama maandooriyaha ama jebiya qodobada u degsan hab-raacyada amniga.
Mas'uuliyadda badeecadaha	Sida hadba ku xusan sharciga heshiiska gaadiidka badeecadaha wuxuu caymiska daboolayaa waxa shirkadda sharci ahaan ay mas'uul ka tahay.
Waxyeelida u sabab ah dhac hubaysan ama jirdil	Magdowga caymiska ugu badnaantii waa 25.000 NOK
Qalabyada gaariga	xisaabiyaha aaladda lagu xisaabiyo kirada tagaasida iyo qalabyadiisa, qufulka aalkolad, ragaadda gaariga curyaanada, farshaxanka baabuurrada iwm. Magdhowga caymiska ee ugu badan waa 100 000 NOK
Dokumentiyadaha ruqsadda	Xitaa raacsan dokumentiyada ruqsadaha ee xiriirka la leh isticmaalka gaariga, iyo xitaa raacsan dokumentiyada ruqsadaha ee xiriirka la leh isticmaalka waddada
Shandada macaamilka	magdhawga caymiska waa NOK. 10.000,-
Kharashyada cadaaladda xiriirka la leh	magdhawga caymiska waa 100 000 NOK,-
Shilka wadaha iyo rukaabka	caymisku wuxuu khuseeyaa wadaha iyo rukaabka ba curyaamid iyo/ama dhimasho.
Khasaaro/hantida shirkadda ka lunto	caymisku wuxuu daboolaa ilaa 40 maalmood, iyo ugu badnaantii 3 500 NOK maalintii (waxaan daboolnaa khasaarada dhabta ah, waa in isla natiijada dhaqaaleed hesho sidii waxyeellada shilka usan dhicin oo kale)
Waxyeellada mashiinadaha	waxyeellada mashiinka iyo qalabyada wadista baabuurta ayaa daboolan, haddii gaarigu u 4 sannadood socday ugu badnaantii 300 000. Kharashka caymisanaha u bixin doono haddii in aan ka badnayn 150 000 km inta u socday, waa boqolkiiba 25% ee kharashka dayactirka, ugu yaraan waa 20 000 NOK. Haddii u socday in ka badan 150 000 km, waa boqolkiiba 40% haddii kharashka dayactirka ugu yaraan u yahay 20 000 NOK.
Haddii shidaal ku haboonayn gaariga lagu shubo	caymiska kharashka ka nadiifinta iyo dayactirka/dib u hagaajinta waxyeellada u sabab ah shidaalka qalad ahaan gaariga loogu shubay waa ugu badnaantii 25.000 NOK (lama bixiyo kharashka caymisanaha u bixin doono)